

Kaarka madadaalada 2023

Kaarka madadaalada ee degmada Sandefjord

Kaarka madadaalada waa wadashaqayn dhexmarta ciyaaraha/kooxaha gaarka ah, degmada Sandefjord iyo NAV. Nidaamkan waxa uu hubin doonaa in carruurta iyo dhalinyarada ka soo jeeda qoysaska dhaqaalahoodu liito ay helaan fursado wanaagsan oo ay kaga qayb qaataan hawlaha dhaqanka iyo madadaalda.

Kaarka madadaalada iyo ka dhigtistiisa hab-dhijitaal 2023

Kadib go'aan siyaasadeed kiis 065/21 ee noofambar 2021, hab dhijitaal ah ayaa hadda laga dhigay kaarka madadaalada.

isla kiiski, go'aan ka so baxay ayaa sidoo kale laga dhigay wixii hore loogu yeeri jiray kaarka waayo-aragnimada in hadda loogu yeero kaarka madadaalada.

Laga bilaabo Janaayo 2023, kaarka madadaalada waa dhijitaal.

Kuwa bartilmaameedka ah

Kaarka madadaalada waxaa la siin karaa carruurta iyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 2-18 sano ee qoysaska dhaqaalahoodu liito. Sannadka 2023, degmada Sandefjord waxay haysata 600 oo kaar oo la qaybin doono, hal kaar cunugiba/dhalinyarkiiba. Waxa la qiimeeya inta kaar ee qoysku helayo, laakin qaysaska dhawr carruur haysata waxaa la siin kara kaar badan.

Sida loo codsado

Codsiyada kaarka madadaalada waa in loo gudbiyo NAV. Foom codsi fudud ayaa laga heli kara hoos. Foomkan waa in la daabaca, laa buuxiyaa oo la keenaa xafiiska NAV oo ay la socdaan dukumentiyiyo/cadayn. Codsiyada la soo gudbiyay iyada oo aan la socon dukumeenti/cadayn lama tixgelin doono. (Dakhliga kuso galo iyo kharshaadka waa in la soo cadeeyo).

Adreeska booqashada ee Nav Sandefjord waa: Thor Dahls gate 1/5, 3210 Sandefjord.

[Foomka codsiga kaarka madadaalada 2023](#)

Shuruudaha bixinta kaarka

Marka laga tago xaaladaha dhaqaale, waxay noqon doonta mid habboon in la tixgeliyo arrimo kala duwan oo bulsheed, sidaas darteed shuruudaha bixinta kaarka waxay noqon doontaa isku-darka dhaqaale iyo mid bulsheed. Waa NAV kuwa helo codsiyada oo qoondeeya kaararka madadaalada iyadoo la tashanaya

kalkaaliyayaasha caafimaadka, iskuulada, xanaanada iyo hayada carruurta. Kaarka waxa uu socdaa hal sano markiba.

Markaad hesho kaarka madadaalada:

Marka lagu siiyo kaarka madadaalada, waa in aad ka samaysato profile ama bog sandefjord.friskus.no. Halkan waxaad ka heli doonta tigidhada, adeegyada iyo bixinta kharashka madadaalada iyo wixii la mid ah.

Waxay qaadan kartaa ila 1 usbuuc laga bilaabo marka lagu siiyo kaarka, ilaa kaarkaagu shaqaynayo.

Ma qabtaa su'aalo ama ma u baahan tahay caawimo la xariira kaarka madadaalada?

U dir iimayl fritidskort@sandefjord.kommune.no

Nuxurka

Macluumadka qoondaynta waxaa lagu bixin doonaa akoon kasta oo bogga madadaalada, waxayna ku kala duwanaa doontaa marka loo eego da'da isticmaalaha iyo baahiyada.

Nuxurka 2023:

Tigidhada shineema iyo hawlaha dhaqanka ee xarunta dhaqanka Hjertnes, wa loo qoondayn doona qof kastaba.

10 booqasho ee Bugårdsoarken minigolf. Halki qof hal mar ayaa laga jara.

Waxyaabaha kale kaarka loo isticmaali karo:

ka mid noqosha iyo tababarka goobaha jimicsi ama kooxaha

Ka qaybgalka koobabka iyo xafladaha kale oo uruka ama kooxda qabanqaabsio

Qalabka si gaar ah loogu talagalay hawsha/waxqabadka

Kooxaha, ururada iyo bixiyayaasha kale

Kooxaha iyo ururada hela deeqda dawladda hoose waxaa ka qasab ah inay aqbaalan kaarka madadaalada. Ururada kale ee raba inay ka qaybqaatan nidaamkan iyaaga qeexaya habka aay u aqbaalayan.

Waxaad kooxdada ama ururkaaga ka diiwangelin kartaa Sandefjord Friskus.

Bogga sandefjord.friskus.com

Qarsoodi iyo xilka aamusnaanta

Isticmaalaha kaarka madadaalada waxa uu u baahan yahay in la ilaaliyo aqoonsiga qofka kaarka sita, iyada oo aanay degmadu doonayn in ay dhisto nidaam aad u xafiiseed oo ay adagtahay in la maamulo.

NAV kaliya ayaa leh dulmar guud ee isticmaalayaasha. Waxaa la raba kooxaha iyo ururada, shaqaalaha tigidhada iyo kuwa kele ee daruuri u ah inay la xariiraan isticmaalayaasha, waa inaay ula dhaqmaan shaqsiga iyo kaarka si qadarin iyo tixgelin gaar leh.

Marka isticmaalayaashu ay isticmaalaan kaarka si ay isu qoraan xubinnimada kooxaha iyo ururada, tani waa inay ku dhacda si caadi ah, laakin waxaa la raba in inta ugu yar oo suurto galka oo qof in la marsiiyo, sida tusaale ahaan: maamulaha iyo/ama khasnajigu, keliya inaay ogaadan xubunnimada qofkaan inuu haysto kaarka madadaalada.

Maamulka nidaamka

Waa NAV kuwa haysto dulmar iyo aqoonta dadka qaata kaarka. Adreeska NAV Sandefjord waa: Thor Dahls gate 1/5, 3210 Sandefjord.

La xiriirka bixiyaasha/goobaha isticmaalaha iyo kabida khidmadaha xubinnimada iyo wixii la mid ah waxaa qaabilsan Friskus.

Waa qaybta dhaqanka ee degmada Sandefjord kuwa la socda waxa ku jira kaarka madadaalada.